# OFKA MEEL LA JOOGA QOF CUDURKA QABA

OFKA MEEL LA JOOGA QOF CUDURKA QABA waa dadka isku meesha joogay (Goobta Xiisaha) ee isku waqtiga sida qof qabo COVID-19.

**Qofka Meel La Jooga Qof Cudrka Qaba waxay ku jiraan halis hooseyso ee ku dhicitaanka COVID-19.** Macluumaadkaiyo tallada Qofka Meel La Jooga Qof Cudrka Qaba waxay ku qorantahay webssaydka Wasaarada Caafimaadka, oo waxaa lagu daabici karaa dhinaca warbaahinta, ama dhinaca digniinada App-ka Raadraaca NZ COVID.

## Guriga joog oo is baar?

*Baaritaanada waa bilaash*

**MAYA**

**Illaa** kugu dhaco aastaamaha.

Haddii ay kugu dhacaan aastaamaha, waa inaad soo wacdaa Khadka caafimaadka, is baar iyo guriga joog:

- Illaa aad heshid natiijada laga waayo, **iyo**
- 24 saacadood aastaamahaaga markay joogsadaan kadib.
- Ka gooniyow dadka kale ee gurigaaga haddii aad awoodid.

Warbixinta xarunta baaritaanka soo wac Qadka caafimaadka (**0800 358 5453**) ama booqo healthpoint.co.nz/covid-19/

Waxaa jira taageerada dhaqaalaha ee dadka looga baahanyahay inay joogaan gurigai sabab la xiriirta COVID-19.

**Baaritaanka** laga waayay: Ma **qabtid** COVID-19
**Baaritaanka** laga helay: Waxaad **qabtaa** COVID-19 (Caafimaadka Dadweynaha ayaa ku soo wacayo).

## Iska fiiri aastaamaha?

**HAA**

14 maalmood kadib markii ugu dambeysay aad u dhawaatay qof qabo COVID-19.

**Aastaamaha COVID-19 waxaa ku jiro hal ama ka badan ee kuwa xiggo:** *Qufac cusub ama ka sii darayo, qandhada, neefsashada oo yaraato, dhuun xanuun, sanka duufka leh, lumitaanka ku meelgaarka ah ee urta/dhadhanka.*

Dadka qaar waxay sidoo kale la kulmi karaan: *Shuban, madax xanuun, muruq xanuun, lalabo, jahwareer, xanaaq.*

**Haddii aastaamo kugu dhacaan:**

- Guriga joog
- Soo wac Qadka caafimaadka (**0800 358 5453**)
- Baaritaan hel.

## Miyay dadka la nooshahay u baahantahay wax walba?

**MAYA**

Illaa **ay ku** dhacaan aastaamaha.

Qof walba ee qabo aastaamaha wuxuu u baahanayaa inuu soo waco Qadka caafimaadka, hel baaritaan iyo guriga joog illaa:

- Ay ka helaan natiijada laga waayo, **iyo**
- 24 saacadood aastaamahooda markay joogsadaan kadib.

Qofka qabo aastaamaha waa inuu ka gooniyoobaa dadka kale ee ay la noolyihiin haddii ay awoodaan.

**Joog guriga illaa aad heshid natiijada baaritaanka laga waayay. Guriga joog haddii kugu dhaco aastaamaha. Guriga joog illaa si buuxdo u wanaagsan.**

Soo wac Khadka caafimaadka haddii la kulantid aastaamaha ama u baahantahay tallo: Garaac **0800 358 5453**.

Haddii aad dhibaato ku qabtid neefsashada, soo wac ambalaansaha: Garaac **111**.